
# Mitral Valve Replacement (MVR): Bioprosthetic Valve

Beddelaadda Muruqa Bartamaha Bidixe ee Wadnaha ama MVR:
Dabool Macmal Noole ah




© 2012 The Children's Heart Clinic

Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404



© 2012 The Children's Heart Clinic

**Beddelaadda Muruqa Bartamaha Bidixe ee Wadnaha ama MVR**
Mitral Valve Replacement (MVR)

Mitral valve replacement (Beddelaadda muruqa bartamaha bidixe ee wadnaha) waxaa lagu hagaajiyaa dhuubashada (ciriirka) ama daadashada dhiigga (dhiigdaadashada) muruqa xalleeefsan ee bartamaha bidixda wadnaha. Carruurta badanaa goor hore ayaa wax loo qabtaa, waxay ku xiran tahay ciladda wadnaha.

Waxaa jira noocyo ah dabool kale oo lagu beddeli karo muruqa bartanka wadnaha ee bidixe. Ama waxaa jira dabool-macmileed (dabool laga sameeyo xuub qof, lo', ama doofaar) ama mid ah qalab la farsameeyey ayaa la isticmaali karaa balse waxay ku xiran tahay qorshaha qalliinka. Nooca ugu badan, dabool la farsameeyey ayaa la isticmaalaa.

Furista bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynayaa iyadoo la marayo jeexid ah qalliin hore, haddii uu jiro. Waxaa ilmaha yar lagu xirayaa wadne iyo sambab macmal ah (mashiin ah wadne-sambab). Qeybta bidix kore ee wadnaha ayaa la furayaa oo muruqa xalleefsan ayaa laga soo saarayaa. Mid macmal ah oo le'eg ayaa loo diyaarinayaa oo markaasna waa lagu tolayaa. Daboolka waa la tijaabinayaa si loo xaqiijiyo dhaqdhaqiisa ka dib marka lagu dhejiyo. Qeybta kore markaas waa la xirayaa.

**Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:**

- <u>Wakhtiga Qalliinka</u>: Qiyaastii 4 saac
- <u>Qalabka Tuubooyinka</u>: Badanaa ilmaha waxaa lagu soo celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (oo faleebbe laga qaato ama dhiig laga qaado), faleebbe bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecaanka looga daadinayo, iyo mararka qaarkood xargaha batariga wadnaha oo meelgaar ah.
- <u>Soo-kabashada Caadiga ah Qalliinka Ka-Dib</u>: Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saarayaa wax yar ka dib qalliinka. Tuubada halbowlaha badanaa waxaa laga saarayaa maalmo ka dib, marka laga joojiyo faleebbaha. Markaas tuubada xididdada bartamaha waxaa laga bixinayaa marka laga joojiyo ee aan loo baahneyn daawo awgeed iyo dhiig in laga qaado. Tuubooyinka xabadka waxaa laga saaraa 24 ilaa 48 saac ka dib qalliinka, markuu yaraado dheecaanka soo baxaya. Waxaa ilmaha la siinayaa heparin wax yar ka dib qalliinka si looga hortago xinjirowga ku dhici kara muruqa cusub dhawaan la geliyey. Marka ilmuhu bilaabo cuntada iyo cabitaanka, waxaa loogu beddelayaa aspirin ama Coumadin, daawooyin afka laga qaato oo looga hortagayo xinjirowga dhiigga. Qiyaas loo yiraahdo International Normalized Ratio (Qiyaasta Caadi Ahaanta Caalamiga), ama INR, ayaa la raacayaa si loo hubiyo in ay qiyaasta Coumadin sax tahay. Heerka INR ee aadka u sarreeya waxay keeni kartaa dhiigbax kedis ah, iyo heer ah INR oo hooseeya waxa uu keeni karaa xinjir in ay sameysato. Marka heerka INR laga dhigo daawada, heparin waa in la joojiyo. Carruurta muruqa cusub waaa badanaa la siiyaa Coumadin dhowr bilood, ka dibna waxaa loogu beddeli doonaa Aspirin.
- <u>Muddada Seexinta Isbitaalka</u>: Wuxuu ilmuhu isbitaalka joogayaa badanaa 5 maalmood ka dib marka loo geliyo MVR.

**Qaadashada Daawooyinka Guriga:** Carruurtu waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib MVR sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Daawada dhiigga jilcisa (Coumadin, Lovenox, Aspirin) looga hortago xinjirowga
- Bakteeriyada endocarditis prophylaxis daawadeeda ayaa loo siinayaa ilmaha laga beddelo muruqa noocan ah.


© 2012 The Children’s Heart Clinic